

**Xeerka Maamulka 12 Agoosto 1957, lamba. 168 rep.**

**Dhismaha Guddidi Farsamo iyo tirada uu ka koobanyahay oo ku saabsan daraasaadka iyo soo diyaarinta qaab-qorsheedka xeerka iyo nidaamka, ee la xariira nidaamka ilaalada.**

### **WASIIRKA ARRIIMAHA GUDAHA**

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 “Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya”;  
Marka uu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 “ Xeerka Xukuumadda Soomaaliya”;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la sameeyo “Xeer Ilaalada” iyo xeer nidaamiyahaooda, haddii loo baahdo;

Marka uu garowsaday baahido loo qabo in daraasaadka iyo uruurinta hindisiyeyaasha xeerarka iyo xeer nidaamiyah arrimaha la soo sheegay in ay galayan iqtisaaska caadiga ee Wasaaradda arrimaha Gudaha;

### **WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA:**

#### **Qod. 1**

Diyaarinta hab-qorsheedka xeerka iyo xeer hoosaadka, lagu sheegay hordhaca, waxaa loo xilsaaray Guddi Farsamo oo ka kooban:

- Dhamme Giovanni Salvano – Guddoomiye
- Mudane Jaamac Gaanni Axmed – Xubin
- Dr. Shiv Kumar Kashyap -- Xubin
- Gashaanle Pasquale Voce – Xubin
- Islaw Mahadalle Maxamed Mahadalle Maxamed -- Xubin
- Dhamme Maxamed Abshir -- Xoghaye

#### **Qod. 2**

Shaqooyinka waa in la soo dhammaystiraa illaa 31 Disember 1957.

#### **Qod. 3**

Qaab-qorsheedka waa in loo soo gudbiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha taariikhda la soo sheegay, taaso ka dib marka ay eegto u soo diraya Golaha Wasiirada, waxaana loogu yeeri karaa in uu ka soo qaybgalo khabiir ahaan xitaa Dhamme Giovanni Salvano, oo uu wehliyo Agaasimaha Waaxda shaqada ku leh.

#### **Qod. 4**

Xeerka Ilaalada iyo xeer hosaadka waa in ay la jaan qaadi karaa intii suurtagala Xeerka Ciidanka Boliiska iyo xeer hoosaadkiisa. Si qeexan waan loo caddeeya xilalka Ilaalada.

## **Qod. 5**

Guddiga waxaa u sugnaaday maalmaha sida rasmiga ay u shaqeyaan, gunnada ku xusan axkaamta jirta.

Muqdisho, 12 Agoosto 1957.

Wasiirka  
**Xaaji Muuse Boqor**

Waa la hubiyay lana Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 4, bogga 145.

Muqdisho, 27 Agoosto 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**